La macaamilka deynta aan la maareyn karin

Waxa annaga nagu saabsan

Hay'ada Ilaalinta Lacagta Australia(AFSA)waa wakaalada dawlada ee masuulka ka ah maamulka iyo shuruucda nidaamka musalifka shakhsiyeed, lacagta debiga laga helay, adeegyada wakiilnimada iyo maamulka Diiwaanka Ilaalada Guryaha Shakhsiyeed (PPSR).

Ujeedadeena waa in la siiyo natiijo siman oo la hagaajiyey isticmaalayaasha, bulshada iyo ganacsiga iyadoo la shaqo gelinayo sharciga ilaalinta hintida shakhsiyeed, sharuucda adeegyada wakiilka iyo xirfadlayaasha musalifnimada shakhsiyeed.

Ka ganacsiga deynta aan la maareyn karin

Dhib kala kulmida maareynta deyntaada waxaa keeni kara sababo kala duwan, iyadoo qaar ka mid ahi noqon karaan wax awoodaada ka baxsan. Tusaale ahaan, shaqo la'aan lama filaan ah, caafimaad xumo ama xiriirka guurka oo baaba'a waxay kicin kartaa dhibaato dhaqaale xumo.

Haddii ay ku haysato dhibaato dhaqaale, waxaa jira talaabooyin aad ka fekeri karto.

Caawimaad helida

La taliyayaasha lacagta ayaa laga heli karaa gobol kasta iyo territory gaba. Adeegoodu waa bilaash,madax bannaan oo qarsoodi ah. Waxaad kala hadli kartaa latiyaha lacagta meel kasta oo Australia ah adoo taleefan uga soo diraya 1800007007. Lambarkan wixii si toos ah ugu hagaajinayaa wicitaankaaga adeeg ku yaal gobolka ama territory ga kuugu dhow.

AFSAwaxay siin kartaa macluumaad maamulayaasha heshiiska deynta iyo wakiilada diiwaangashan ee kuugu dhow. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan gal www.afsa.gov.auama naga soo wac1300364785.

Doorashada fursada ugu fiican

Qof kasta xaaladihiisu waa ka duwan yihiin .fursada ku haboon hal qof waxaa laga yaabaa inaysan ku haboonaan qof kale. Adoo tixgelinaya fursadahaaga, waa muhiim inaad xaqiiqada ka eegto xaaladaada hadda lagu jiro iyo waxaad filayso inay dhacaan mustaqbalka.

AFSAma bixiso tallo ku saabsan fursada adiga ugu haboon xaaladahaaga gaarka ah ee aad ku jirto. Waxaa lagugu dhiidigelinayaa inaad raadsato tallo madax bannaan ka hor intaadan go'aan gaadhin.

Fursadaha aan tooska aheyn

Halka si ee loola macaamilayo deynta aan la maareyn Karin waa u tegida deyn bixiyahaaga (dadka lacagta kugu leh) iyo:

- Codso wakhti badan oo aad ku bixiso
- Dib ugala hadal dib u bixinta ama
- Weydii haddii ay tixgelinayaan lacag bixin ka yar si loo bixiyo deynta.

Si toos ah ayaad ula xiriiri kartaa cidda lacagta ku deymisay ama waxaad caawimaad weydiisan kartaa adeega la taliyayaasha lacagta .

Fursadaha tooska ah

Sharciga Musalifka wuxuu bixiyaa afar fursadood oo toos ah oo loola macaamilo deynta aan la maareyn

Karin. Gelida heshiis toos ah waa mid khatar ah wuxuuna saameyn karaa heerkaaga deynta.

Caddeynta rabitaanka soo jeedinta codsiga deynsanaha(DOI)

ADOI waxay bixisaa ka debcin ku meel gaar ah ee falka xoog adeegsiga deyn bixiyaha. Waxay ka joojineysaa deyn bixiyahaaga aan dammaanada lahayn lacag ka qaadashada mushaarkaaga (lacag ka qaadashada mushaarkaaga) iyo/ama damiinka ama sheriff ka inuu qaato hantidaada si uu deyntiisa u helo, xili ah 21 maalmood. Kama hortegayso deyn bixiye dammaanad leh inuu hantidaada dib ula wareego.

Halka aadan u baahneyn inaad noqoto musalif ka dib xiliga 21 ka maalmood, waxaa jira xad inta jeer ee aad xareyn kartoDOI.

Heshiiska deynta

Heshiiska deynta waa heshiis sharci ahaan ku qaban kara oo u dhaxeeya adiga iyo deyn bixiyahaaga. Waxaad u soo jeedin kartaa deyn bixiyaha inaad qayb qayb u siiso ama hal mar oo laga yaabo inay ka yaraato caddadka deyntaada. Waxaad sidoo kale soo jeedin kartaa inuu deyntaada joojiyo ilaa wakhti go'an si uu kuugu ogolaado inaad soo kabato.

Waxaa jira shuruuda xaq u yeelashada, tusaale ahaan deyntaada aan dammiinka lahayn, hantida iyo dakhliga cashuurta ka dib waa inuu ka hooseeyaa xadad. Heshiiska deynta badanaa waxaa maamula maamulaha heshiiska deynta diiwaangashan (RDAA)oo adeegan lacag ujro ah kugu dalici doona.

Heshiiska lacag la'aanta shakhsiyeed(PIA)

APIA waa heshiis sharci ah oo ku qabanaya una dhaxeeya adiga iyo deyn bixiyahaaga halkaas oo aad u soo jeedisay inaad bixiso lacagta oo dhan ama qaybo yar yar ama caddad dhan.

Iyadoon loo eegin heshiiska deynta, ma jirto wax hanti ah ama xaddadka dakhliga. Waa inaad magacowdaa wakil kontoroola cidda baadhi doonta arimahaaga una warbixisa deyn bixiyahaaga. Haddii deyn bixiyahaagu aqbalo waxaad soo jeediso, wakiilka waa inuu maamulo heshiiska.

Musalifnimada

Haddii aadan awoodin inaad wax kula heshiiso deyn bixiyahaaga, waxaa laga yaabaa inaad si ikhtiyaari ah aad u soo xareyso codsi aad ku noqoneyso musalif. Mar haddii aad musalif noqoto wakiilkaaga ayaa iibin doona hantidaada aan laguu ogoleyn inaad sii heysato si aad lacagta u siiso deyn bixiyahaaga.

Xaaladaha qaarkood, deyn bixiyaha wuxuu qaadi karaa fal uu kaaga dhigayo musalif.

Macluumaad dheeraad ah

Dhammaan fursadaha tooska ah ee lagu dulmarey halkan waxay leeyihiin cawaaqib daran. Waxaa lagu talinayaa inaad baarto dhammaan fursadaha ka hor intaadan gelin heshiis toos ah.

Macluumaad badan oo dheeraad ah oo ku saabsan dhammaan fursadahaas ayaa laga helayaawww.afsa.gov.au.

Isbarbardhiga qaababka

Hoos waxaa ah shax oo ku siineysa isbarbadhigid aasaasi ah oo u dhaxeysa noocyada kala duwan ee maamulka musalifnimada shakhsiyeed. Shaxdan waxay qabaneysaa sidii tusaale sahlan oo isbarbardhig ah oo kaliya oo qaababkana waxaa laga yaabaa inay isu bedelaan xaalado khaas ah. Shax isbarbardhig badan oo faahfaahsan ayaa laga helayaa website ka AFSA.

Isbarbardhigida qaababka u dhaxeeya noocyada kala duwan ee maamulka musalifnimada	Heshiiska deynta	Heshiiska lacag yaraanta shakhsiyeed	musalifnimada
Xaq u yeelashada			
Xiriirka Australiya ayaa loo baahan yahay	Maya	Haa	Haa
Saameeyey musalifnimadii hore	Ogow 1	Ogow 1	Ogow 1
Dakhli/hanti/hadka deynta ayaa khuseeya	Haa	Maya	Maya
Dakhli, shaqo iyo ganacsi			
Lacag bixinta dakhliga loo baahan yahay	Ogow 2	Ogow 2	Ogow 3
Awooda aad ku sii wadeysid inaad ka shaqeyso ganacsi	Ogow 4	Ogow 4	Ogow 5
Awooda aad ku noqoneyso agaasime, ama maareeye, shirkad weyn	Haa	Maya	Maya
Xanibaadaha kale ee shaqo ee dhici kara	Haa	Haa	Haa
Hanti			
Awoodii aad ku heysan lahayd hantida, oo ay ku jirto hantidaad heshay inta lagu jiro heshiiska/hantidamusalifnimada hore loogu helay/	Ogow 4	Ogow 4	Ogow 6
Iibiyey/wareejiyey wax ka yar qiimaha suuqa	Maya	Ogow 2	Haa
Helitaanka lacagaha la siiyey deyn bixiyaha ka hor heshiiska/ musalifnimada	Maya	Ogow 2	Haa
Deymaha			
Mudnaanta lacag bixineeyd ee deymaha qaar aan damaanada lahaynebts	Maya	Ogow 2	Haa
Deymaha daamanada leh ee ay saameysay	Maya	Maya	Maya
Ka fasaxida deymaha	Ogow 7	Ogow 7	Ogow 7
Xaddidaha			
Safarka dibeda	Maya	Maya	Yes
Safarka Australia gudaheeda	Maya	Maya	Maya
Gelitaanka deyn dheeraad ah	Ogow 8	Maya	Note8
Kharashaadka iyo lacagaha ujrada			
Lacagta sharciga ah ee lagu xareeyo,lacagaha dastuuriga ah	Haa	Haa	Haa

Ogow 1:ku xiran nooca maamulka iyo wakhtiga ilaa iyo lacag yaraantii hore.Ogow 2:Haa,haddii loo siiyey heshiis.Ogow 3:haa,haddii xadka dakhliga dastuuriga ahi uu ka batay. Ogow 4:haa,inuu heshiisku si kale sheegay mooyee.Ogow 5:inay ku xiran tahay xalada ganacsiga iyo/ama go'aanka wakiilka.Ogow 6: guud ahaan maya, laakiinse hantida qaarkeed oo laga saaray.Ogow 7: guud ahaan haa,laakiinse deyntii inaan ladeyn. Ogow 8:waa inuu muujiyaa heshiiska/musalifnimada marka deyntu ay gelayso wax ka badan hadka dastuuriga ah.

Sidii aad noola soo xiriiri lahayd

Adeegyada lacag yaraanta
Website:www.afsa.gov.au
Email:info@afsa.gov.au
Taleefanka :1300364785
Saacadahashaqada (AESTiyoAEDT): • IsniintailaaJimcaha8.30gh ilaa 8gd • SabtiiyoAxad–Xiran • FasaxyadaDadweynahaeeQaranka–Xiran Fadlankajeegaree website keenasaacadahashaqadaxafiiskaintalagujiroxiligaCiidagaaladaiyoSannadkacusub.

Caawimaada luuqadaha kale

Macluumaadka luuqadaha aan Ingiriiska ahayn waxaa laga heli karaawww.afsa.gov.au.Haddii dhib kaa heysto ku hadlida ama fahamka Ingiriiska, waxaad ka wici kartaa Adeega Turjumaada Qoraalka iyo Afka(TIS)National131450 oo kharashkiisu yahay ka wicitaanka caadiga ah oo kale.TISwaxaa la heli karaa 24saac maalintii,toddobada maalmood isbuucii in ka badan 170 luuqadood.